Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# Qorshe-Howleedka Geeddi Socodka Dib-U-Eegista Dastuurka

Qormada 2aad

Jabuuti

02 March, 2019

# TUSMO

1 Gogoldhig ........ 1
2 Ujeedooyinka Qorshe-Howleedka ........ 1
3 Mabaadi'da Hagaysa Qorshahan ........ 2
3.1 Waqtiga ........ 2
4 Hay'adaha dowrka Muhiimka ah ku leh iyo Daneeyeyaasha Dib-u-eegista Dastuurka ........ 3
5 Hiigsiga Geeddi-Socodka ........ 7
6 Arrimaha muhiimka ah in la Gaaro ........ 7
6.1 Qaabeynta Dastuurka ........ 8
6.2 Ka Wada Xaajoodka Arrimaha Siyaasadda ........ 8
6.3 Soo bandhigidda iyo Daabicidda Warbixinta Xulashooyinka Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaankii 9aad ........ 8
6.4 Wacyigelinta iyo Ka Qeyb-qaadashada Dadweynaha: ........ 9
6.5 Madasha Qaran ee Wadatashiga iyo Is-Afgaradka ........ 9
6.6 Dib-u-eegista iyo Ansixinta Dastuurka ........ 9
6.7 Afti Dadweyne ........ 10
6.8 Waafajinta Dastuurada Dawlad Goboleedyada Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee la ansixiyay ........ 10
7 Sida loo Hirgelinayo Qorshahan ........ 10
7.1. In la helo Is-faham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Baarlamaanka FS. ........ 10
7.2. In la helo Isfaham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada dhexdooda. ........ 10
7.3. Dhamaystirka qorshe howleedkan ........ 11
7.6. Diyaarinta Arimaha Hortabinta u leh Dib-u-eegista Dastuurka ........ 12
7.7. Ololaha La-tashiga iyo Wacyigelinta Dadweynaha ee la xiriira dib-u-eegista Dastuurka ........ 12
7.8. Diyaarinta Qabyo-qoraalka Wax-ka-beddelka Dastuurka ........ 13

7.9. La-tashi siyaasadeed ee Hay'adaha ku shaqada leh Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka ee la xiriira Qabyo-qoraalka wax ka badalka dastuurka ........ 14

7.10. Shirweynaha Qaran ee Dhameystirka Dastuurka ........ 15

7.11. Soo saarista nuqulka kama dambeysta ah ee wax-ka-beddelka Dastuurka ........ 15

Iyada oo lagu saleynayo natiijada ka soo baxday wadatashiyada siyaasadeed iyo kuwa dadweynaha 15

7.12. Ololaha Wacyigelinta ee la xiriirta Wax-ka-beddelka Dastuurka la meel mariyey iyo qaabka Aftida 16

8. Jadwalka Qorshe-Hawleedka ........ 0

# 1 GOGOLDHIG

Doorashadii Baarlamaanka 10-aad JFS ee Guddiga La socodka iyo Dib-u-Eegista Dastuurka iyo magacaabistii Golaha Xukuumadda waxay gundhig u noqotay wajigii 2-aad ee geedi socodka dib-u-eegista Dastuurka, dib-u-eegistaas oo soo bilaabatay sanadii 2012kii.

Sameynta Dastuur sharciyad leh oo loo wada dhanyahay ayaa ah furaha nabadeynta, dib-u-heshiisiin iyo aas-aaska dhismaha hay'adaha dowliga ah, dib-u-soo nooleynta adeeg bixinta iyo hiigsiga horumar waara. Hanaanka dib-u-eegista Dastuurka Soomaaliya, waxaa uu socday muddo dheer oo uu weli yahay qabyo aan wali lasoo dhameystirin. Haddaba, si aan loo lumin waqti badan oo kale, waa in si deg-deg ah loo dhameystiro dib-u-eegista dastuurka mudada loo qorsheeyay.

Iyadoo laga ambaqaadayo dastuurka KMG ah, Baarlamaanka 10aad waxaa la doortay inta aan la dhameystirin arrimo muhiim ah ee dastuurka, sida in la dhaqangeliyo Qodobka 54aad, kaasoo u baahan in Dawladda Federaalka ah ay Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya kala xaajooto qoondeenta awoodaha ay kala leeyihiin dawladda federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah JFS iyo wadaagga kheyraadka dabiiciga iyo dakhliga. Sidoo kale Dastuurku KMG ah qodob ka mid ah kama tarjumayo xaqiiqda siyaasadeed ee dalka hadda ka jirta, sidaas darted, waxaa lagama maarmaan ah qaabeynta dastuurka si lo saxo khaladaadka ku jira dastuurka KMG. Xaqiiqda kale waxay tahay in dhammaan dawladaha xubnaha ka ah JFS ay horay u samaysteen Dastuuradooda u gaarka ah. Hadaba, caqabadaha jira waxaa ka mid ah in dastuurada dawladaha xubnaha ka ah JFS aysan waafaqsaneyn Dastuurka KMG ah JFS. Sidaa darteed, waa in dastuurada Dawladaha xubnaha ka ah JFS la waafajiyaa dastuurka JFS.

# 2 UJEEDOOYINKA QORSHE-HOWLEEDKA

1. Xaqiijinta Dastuur qaran oo dhameystiran, kaasoo lagu dhamaynayo muddada loo cayimay.
2. In la hubiyo in hanaanka dib-u-eegista Dastuurka uu ku salaysan yahay wadahadal qaran iyo wadatashiyo dadweyne oo loogu talagalay dadka Soomaaliyeed iyo hay'adaha dowrka ku leh hanaanka dib-u-eegista Dastuurka.
3. In la kobciyo garaadka muwaadiniinta Soomaaliyeed iyadoo loo marayo barnaamij wacyi gelin awood u siinaya in bulshadu xuquuqdooda iyo waajibaadkooda dastuuriga ah ay fahmaan.

# 3 MABAADI'DA HAGAYSA QORSHAHAN

Ujeeddada hannaanka dib-u-eegista Dastuurku waa in la helaa Dastuur dhammaaystiran oo bogsiiya khilaafaadka bulshada, lana aasaaso bulsho mideysan oo leh dhaqan ku saleysan qiyamka islaamka, sarreynta sharicga, dhaqanka Soomaaliyeed, caddaalad bulsho iyo xuquuqaha assaasiga ah ee aadanaha.

***Hannaanka dib-u-eegista Dastuurku waa inuu ku saleysnaadaa arrimahan:***

## 3.1 Waqtiga

Waxaa lagama maarmaan ah in hannaanka dib-u-eegista Dastuurku uu ku dhammaado muddada ku cayiman qorshahaan, maadaama hannaanka Dastuur sameyntu ay soo jiitamaysay muddo dheer.

## 3.2 Sii-wadid

Geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ma ahan mid bilow ah, waxaana muhiim ah in laga sii wado hawshii uu soo qabtay Barlamaankii 9aad. Wasaarada Arrimaha Dastuurka, DFS, Guddiga La socodka iyo Guddiga Madaxabanaan waxay garowsadeen in la qiimeeyo waqtiga iyo dhaqaalaha lagu bixiyey oo marnaba aan la baalmari karin. Sidaas darted, waa in si guudna loogu soo bandhigaa dhamaan hay’adaha dowrka ku leh.

## 3.3 Daah-furnaan, isla-xisaabtan leh oo Loo Dhan yahay

Habraacan lagu heshiiyey waa in uu noqdaa mid daah-furan, oo loo dhanyahay, noqdaana mid sharci ah. Qaabkan waxaa lagu heli karaa in dhammaan hay’adaha dowrka ku leh la siiyo fursad ay wax kusoo biiriyaan, sidaa darteedna waxaa lagama maarmaan noqonaysa wadatashiyada iyo dhex-galka dadweynaha.

## 3.4 Qaab-dhismeed waxtar leh

Qaab dhismeedka hannaanka geedi-socodka waa inuu noqdaa mid sahlan oo aan keeneyn khilaaf aan loo baahneyn, si loo xaqiijiyo in loo dhanyahay hannaankan lana hubiyaa in dhammaan hay’adaha dowrka ku leh, ay si mug leh wax ugu soo dari karaan hannaanka.

## 3.5 Lahaanshaha

Hannaanka dib-u-eegista dastuurku waa in uu noqdaa mid Soomaali leedahay Soomaalina hogaamineyso iyadoo lagu saleenayo mabaada’a isku-tashi iyo madaxbannaani.

## 3.6 Sareynta Sharciga

Inta lagu guda jiro hannaanka dib-u-eegista Dastuurka, dhammaan hay'adaha dowrka muhiimka ah ku leh waa in ay u wada hogaansamaan sareynta sharciga.

### 3.7 Dhowrista Xuquuqda Aadanaha

Hannaanka dib-u-eegista Dastuurka waa in uu dhowraa xuquuqaha asaasiga ah ee aadanaha iyadoo la tixgelinayo mabaadi'da Islaamiga ah oo aan lagu xadgudbin.

# 4 HAY'ADAHA DOWRKA MUHIIMKA AH KU LEH IYO DANEEYEYAASHA DIB-U-EEGISTA DASTUURKA

Hay'adaha dowrka ku leh: -

a) Wasaarada Arrimaha Dastuurka, DFS
b) Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaanka Federaalka
c) Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
d) Laamaha Fulinta iyo Sharci-dejinta ee Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Hay'adaha hoos ku qoran waxa ay qeyb ka yihiin Geedi-socodka:

a) Hay'adaha Qaran ee Ku Shaqada Leh.
b) Wasaaradaha Federaalka ee Ku Shaqada leh
c) Bulshada Rayidka ah iyo
d) Qeybaha kale bulshada ee Muhiimka ah.

### 4.1 Dowrka iyo Masuuliyadaha Hay'adaha Ku Shaqada leh Dib-u-eegista Dastuurka

Qodobada 63(a), 69 (2) (g) iyo 71 (a & g) ee Dastuurka KMG ah waxaay siinayaan Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare awooda Dastuuriga ah ee dib-u-eegista Dastuurka.

Sidoo kale Qodobka 133aad ee Dastuurka ayaa abuuraya Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka si uu ula socdo una tilmaamo hannaanka dib-u-eegista dastuurka ka hor muddo-xileedka Baarlamaankii 9aad. Isla qodobkan ayaa faraya in labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka uu midkiiba soo doorto shan (5) xubnood oo ka mid noqda guddiga dib u eegidda iyo lasocodka dastuurka ee BFS isla markaana Dawlad goboleed kasta siinaya inay u soo magacawdo hal ergay oo ka mid noqda guddiga dib u eegidda iyo lasocodka dastuurka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 134aad waxaa uu aasaasayaa Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka si uu taageero farsamo u siiyo Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ka hor muddo-xileedka Baarlamaanka 9aad. Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS ayaa u xilsaaran soo

jeedinta magacaabidda xubnaha Guddiga Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka. Ka dib Qaraar Baarlamaankii 9aad uu soo saaray lana ansixiyey bishii Juun 2016kii ayaa, shaqada dib-u-eegista dastuurka loo gudbiyey Baarlamaanka 10aad. Guddigii hore ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ayaa soo bandhigay warbixin ku saabsan dib-u-eegista dastuurka oo ka koobneyd saddex xulasho, kuna wareejiyay Guddiga dib u eegista iyo la socodka Dastuurka ee Baarlamaanka 10aad.

### 4.1.1 Mas'uuliyadda iyo Waajibaadka Wasaaradda Arrimaha Dastuurka waxaa kamid ah:

1. In ay fududeyso abuurista xaalado iyo jawi suuragelinaya hirgelinta meelmarka iyo hannaan hufan oo la xiriira geedi socodka dib-u-eegista iyo hirgelinta Dastuurka, taas oo ku imaaneysa:
   a) Fududeynta wadaxaajoodka siyaasadeed ee u dhaxeeya dawladda Federaalka Soomaaliya iyo dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ee ku saabsan arrimaha qoondaynta awoodaha ay kala leeyihiin dawladda federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah JFS, wadaagga khayraadka iyo dakhliga, maqaamka caasimadda, amniga, nidaamka garsoorka dalka IWM.
   b) Fududeynta, ka qaybqaadashada latashiyada iyo wacyigelinta dadweynaha ee ku saabsan hawsha dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka lagala yeelanayo Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, Maamuladda kale ee hoos yimaada Dowladda Federaalka, ururadda siyaasadda, bulshada rayidka, Haweenka, Dhallinyarada iyo guud ahaanba shacabka Soomaaliyeed si loo abuuro jawi daah furan, loo wada dhanyahay oo la xiriira geeddi socodka Dib-u-Eegista Dastuurka iyadoo lala kaashanayo Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxabanaan ee Dib- u- Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.
   c) Fududaynta iyo qorsheynta maalgelinta lagu fulinayo hawlaha geedi socodka dastuurka oo laga soo uruurinayo dawladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka iyo deeq bixiyaasha Caalamiga ah iyadoo lala tashanayo Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan.,
   d) Waxay si madaxbanaan u qorsheenaysaa una maamulaysaa miisaaniyadda Wasaaradda Arrimaha Dastuurka, iyadoo la dhowrayo shuruucda Maamulka Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   e) Ka qayb qaadashada abaabulka, uruurinta dhaqaale iyo diyaarinta farsamada looga baahan yahay si loo suurtogeliyo in howsha dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurku noqoto mid si dhammaystiran u qabsoonta, iyadoo lala kaashanayo Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan.

f) Xoojinta isku duwidda hay'adaha xiriirka la leh geedi socodka dib-u-eegidda Dastuurka iyo Isku dubaridka dhammaan hawlaha maamul ee fududeynaya habsami u gudashada hawlaha inta lagu guda jiro geedi socodka dib-u-Eegista iyo hirgelinta Dastuurka iyadoo lala kaashanayo labada Guddi ee Dib-u-Eegista Dastuurka.
g) Kor u qaadidda iyo abuuridda jawi suuragelinaya wada shaqeyn iyo is garabsi dhex mara hay'adaha muhiiimka ah ee ku lug leh geedi socodka dib-u-eegista Dastuurka.

2. Xaqiijinta aragtida mideysan ee mowqifka rasmiga ah ee hay'adaha Dowladda Federaalka ka qabto hawsha Dib- u-eegista iyo hirgelinta Dastuurka.
3. Diyaarinta iyo dhaqangelinta sharci Afti Qaran taas oo saldhig u noqonaysa qabashada Afti Dadweyne oo lagu ansaxiyo Dastuurka.
4. Fududeynta xaladaha suurtagelinaya in la helo jawi siyaasadeed oo lagu diyaarinayo laguna qabto Afti Dadweyne oo Dastuurka loo qaado.

### 4.1.2 Masuuliyadda iyo Waajibaadka Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka:

Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu u gudanayaa mas'uuliyadiisa iyo waajibaadkiisa si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka Federaalka KMG ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin:

1. Wuxuu la soconayaa, tilmaamayaa, islamarkaana meelmarinayaa howlaha Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka si waafaqsan Dastuurka KMG ah iyo Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.
2. Wuxuu u gudbinayaa Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka mashruuc sharci qabyo qoraal ah, tilmaanna ka siinayaa qaabka ay u kala hortabin leeyihiin, si loo xaqiijiyo is waafaqsanaanta iyo isku xirnaanta axkaamta Dastuurka qabyada ah.
3. Waxay dhexdooda dib-u-eegis ku sameeynayaan xeerarka qabyada ah iyo warbixinta la socota oo uu soo gudbiyay Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.
4. Wuxuu ku wargalinayaa lana tashanayaa bulshada rayidka, culimada, haweenka, dhalinyarada, ururada siyaasadeed iyo dhammaan qaybaha kale ee dadweynaha waxyaabaha uu ka koobanyahay soo jeedinta iyo warbixinta uu soo gudbiyay Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Arimaha Dastuurka.

5. Wuxuu hubinayaa in dadweynaha la siiyo fursado ku filan oo ay kaga qeybqaataan doodaha intii suurta gal ah.
6. Wuxuu la tashanayaa guddiyada iyo xubnaha kale ee Baarlamaanka Federaalka.
7. Wuxuu la tashanayaa Hay'adaha Sharci-dejinta ee dawladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
8. Wuxuu si madaxbanaan u qorsheenaya una maamulayaa miisaaniyadda Guddiga La socodka iyo dib-u-eegista Dastuurka, iyadoo la dhowrayo shuruucda Maamulka Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
9. Wuxuu diyaarinayaa qorshaha hawleedka iyo hannaanka dib-u-eegista dastuurka iyo miisaaniyad lagama maarmaanka u ah ee lagu fulinayo howlaha geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka iyadoo lala kaashanaayo Wasaaradda Arrimaha Dastuurka iyo Guddiga Madaxabanaan ee Dustuurka. -
10. Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu korjoogteynayaa, lana xisaabtamayaa hawlaha Wasaaradda Arimaha Dastuurka iyo Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgalinta Dastuurka si waafaqsan Dastuurka KMG ah.

### 4.1.3 Masuuliyadda iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMD) wuxuu u gudanayaa xilalkiisa iyo waajibaadkiisa si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuuurka Federaalka KMG aha iyo qodobka 12aad ee sharciga lagu dhisay Guddiga Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee soo baxay 3dii Luulyo 2013kii waxaana ka mid ah:

1. Howshiisa u guto hadba sida uu Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka uu tilmaamo, Iyagoo diyaarinaya wax ka bedelka Dastuurka si waafaqasan jadwalka koowaad (C), ama la soo jeediyo mashruuc sharci qabyo ah sida ku cad jadwalka (D) ama hadba sidii kale ee loo baahdo.
2. Diyaariyo warbixin ku salaysan cilmi baaris iyo xog ururin taasoo tilmaan ka bixineysa qodob, cutub ama mashruucsharci oo loo soo gudbiyay wax ka beddelkiisa.
3. Dhameystiro baaris sharciyeed ama xaqiiqo ee lagama maarmaanka u ah gudashada howsha dib u eegista Dastuurka.
4. U gudbiyo Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka soo jeedinta wax ka beddelka qodobada Dastuurka oo dhammeystiran ama mid qabya ah oo ay la socoto warbixin.

5. U gudbiyo Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Baarlamaanka warbixin saddex biloodle ah ama haddii laga soo codsado wixii ku soo kordhay dib u eegista iyo hirgelinta Dastuurka iyo caqabad kasta oo hortaagan si wax looga qabto.
6. Si madaxbanaan u maamulo dakhliga loo qoondeeyay ee loogu talagalay howlaha Guddiga Madaxbanaan ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyadoo la dhowrayo shuruucdda Maamulka Maaliyadda ee JFS.
7. Helo shaqaale ku filan, iyadoo loo fiirinayo hadba inta Miisaaniyadda ay la eg tahay, si ay u gutaan xilkooda hab waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda Dalka.
8. U guto hawl kasta oo u dirsado Guddiga Dib-u-Eegista iyo La socodka Dastuurka ee Barlamaanka.

# 5 HIIGSIGA GEEDDI-SOCODKA

Muddada xilhaynta Baarlaamaka Federaalka Soomaaliya iyo Xukuumada Dawladda Federaalka waxa ay ku egtahay 2020-2021. Inta badan sanadka ugu dambeya, xildhibaanada intooda badan waxaa dareenkoodu jiraa xilliga qabashada doorashooyinka u qorsheysan, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in hiigsiga geeddi-socodkan lasoo gunaanado kahor Diseembar 2019 lana helo dastuur la wada aqbalay, lana ansixiyey ka hor Diseembar 2019.

# 6 ARRIMAHA MUHIIMKA AH IN LA GAARO

Arrimaha ugu muhiimsan ee la doonayo in lagu xaqiijiyo qorshe-hawleedkan (Road-map): -

a) Qaabeynta Dastuurka.
b) Ka wada xaajoodka soo bandhigidda arrimaha siyaasadeed iyo daabicidda warbixinta xulashooyinkii Baarlamaankii 9aad.
c) Waxbarashada Madaniga ah iyo ka Qeyb-qaadashada Dadweynaha
d) Madasha Qaran ee Wadatashiga iyo Is-afgaradka
e) Dib-u-eegista iyo Ansixinta Dastuurka
f) Afti ama Ansixin Qaran
g) Waafajinta dastuurada Dawlad Goboleedyada Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee la ansixiyay

***Faahfaahinta Arrimaha Muhiimka ah in la Gaaro:***

## 6.1 Qaabeynta Dastuurka

Dastuurka KMG ah, kama turjumayo xaqiiqada siyaasadeed ee hada ka jirta dalka, waxaana lagama marmaan ah in la saxo. Guddigii hore ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaankii 9aad ayaa caddeeyey inay jiraan qaladaad farsamo oo badan iyo qodobo badan oo iska-hor-imaanaya oo ku jira Dastuurka KMG una baahan in wax laga qabto marka la sameenayo waxka-beddelka Dastuurka.

## 6.2 Ka Wada Xaajoodka Arrimaha Siyaasadda

Waa in uu jiraa wada xaajood lagu qoondeynayo awoodaha ay kala leeyihiin dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, wadaaga kheyraadka dabiiciga iyo mabaadi'da guud ee maaliyadda dawladda, si waafaqsan Qodobada 44aad, 54aad iyo 122aad ee Dastuurka KMG ah. Si loo gaaro dawlado xubno ka ah Federaalka oo dhismahooda dhamaystiran yihiin, waxaa lagama maarmaan ah inuu jiro wadaxaajood siyaasadeed oo lagu dhameystirayo astaameynta xuduudo maamuleedyada iyo tirada Dawladaha xubnaha ka ah dawladda Federaalka si waafaqsan Qodobka 49aad ee Dastuurka. Arimaha kale oo laga wada xaajoonayo waxaa ka mid ah kuna koobnayn: Maqaamka Caasimadda Muqdisho, jinsiyadda Jamhuuriyadda Soomaaliyeed iyo hannaanka Hay'adaha heer Federaal oo ay ka mid yihiin Laamaha Sharci-dejinta, Laanta Fulinta iyo Laanta Garsoorka.

## 6.3 Soo bandhigidda iyo Daabicidda Warbixinta Xulashooyinka Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaankii 9aad

Guddigii La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaankii 9aad iyo Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxay dhameeyeen nuqulkii koowaad ee dib-u-eegista Dastuurka. Warbixin ayaa la isugu uruuriyey, haseyeeshee mudadii xilhaynta Baarlamaanka 9aad oo dhamaatey awgeed ma jirin fursad looga doodo geedi socodkana lagu dhameystiro. Sidaa daraadeed, waxaa najiijada howgalkooda lagu soo ururiyey warbixin ay ku soo jeediyeen saddex xulasho oo loo soo gudbiyey Guddiga La socodka ee Baarlamaanka 10aad si uu ugu dulshaqeeyo warbixinta saddexdaas xulasho.

Hadaba waxaa lagama maarmaan ah in xulashooyinkaas loo bandhigo Dowlad Goboleedyada si looga doodo fikradohoodana ku soo kordhiyaan. Xulashooyinka saddexda ah waa in ay noqdaan aas aaska doodaha, iyo in warbixinta loo daabaco dadweynaha si ay ra'yigooda ugu soo kordhiyaan. Howshan waa in la qabtaa ka hor dhamaadka Diseembar 2017ka.

### 6.4 Wacyigelinta iyo Ka Qeyb-qaadashada Dadweynaha:

In bulshada lagu wacyigaliyo arrimaha dib u eegista Dastuurka waxay dadweynaha u suurta galinaysaa in ay si mug leh uga qayb qaataan doodaha soona bandhigaan afkaartooda, waxaana lagama maarmaan ah in wacyigelinta iyo doodaha dadweynuhuba lagu qabtaa dhammaan deegaanada Dawladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka..

Haddaba, si milkiyadda Dastuurka u noqdo mid Soomaali leedahay ayna hogaamiso, waxaa lagama marmaan ah in dadweynaha si ballaaran looga talogeliyo iyadoo loo maryo la tashiya dadweynaha iyo wacyi gelinta bulshada si ra'yigooda iyo fikirkooda ay soo jeediyaan loogu daro dhameystirka dib u eegista Dastuurka.

Hirgelinta howlahan waa masuuliyad wadareed ay u wada xilsaaran yihiin Wasaarada Arrimaha Dastuurka, Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka, Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, Wasaaradaha masuulka ka ah Arrimaha Dastuurka ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS iyo sidoo kale guddiyadda Baarlamaanada heer dowlad-Goboleed ee qaabilsan La-socod dib-u-eegista dastuurka. Si uu u noqdo hanaanka geedi-socodka mid loo dhanyahay, waxaa lagama maarmaan ah in laga qeyb-geliyo ururada bulshada rayidka, laga bilaabo daabacaadda warxbixinta xulashooyinkii Baarlamaanka 9aad kasoo soconaya ilaa soo jeedinta oo dhan la uruuriyo loona gudbiyo Baarlaamaanka 10aad.

### 6.5 Madasha Qaran ee Wadatashiga iyo Is-Afgaradka

Madasha Qaran waxaa isugu imaanaya hay'adaha dowrka muhiimka ah ku leh geedi-socodka Dastuurka si looga wada hadlo arrimaha siyaasadeed ee la xiriira dib u eegista dastuurka loogana gaaro heshiis.. Hay'adaha doorka muhiimka ah ku leh waa laamaha fulinta iyo sharci-dejinta ee heer Federaal iyo heer dawlad goboleed.. Haddaba, waxaa lama huraan ah in la helo madal ay dhamaan hay'adahaas kaga doodaan islana meel dhigaan dhamaan arrimaha Dastuurka ee u baahan go'aanno siyaasadeed. Haddii aysan jirin is-af-garad ka dhexeeya hay'adaha dowrka muhiimka ah leh, ma dhameystirmi karo dastuurka. Arinkan waa shaqo siyaasadeed, waxaase loo baahan yahay in dhammaan hay'adaha ku lug leh dib-u-eegista Dastuurka in ay wada-shaqeeyaan kuwaas oo ay ka mid yihiin Wasaarada Arrimaha Dastuurka, Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga Madax banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

### 6.6 Dib-u-eegista iyo Ansixinta Dastuurka

Qodobada 69 (2) (g) iyo 71 (g) ee Dastuurka Federaalka waxay xeerinayaan in Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ay awood u leeyihiin dib-u-eegista Dastuurka; Qodobka 136aadna wuxuu Baarlamaanka Federaalka awood u siinayaa in nuqulka kama dambeysta ah ee Dastuurka ku

ansixiyo aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) xubnaha aqal walba ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Ansixinta BFS waa in inay qabsoontaa ka hor Diseembar 2019.

### 6.7 Afti Dadweyne

Haddii aan si kale BFS u go'aamin, Qodobka 136aad, farqadiisa 2aad wuxuu xeerinayaa in afti dadweyne si kama-dambeys ah loogu ansixiyo Dastuurka oo lagu sameeyey dib u eegis.

### 6.8 Waafajinta Dastuurada Dawlad Goboleedyada Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee la ansixiyay

Waafajinta Dastuurada Dawlad Goboleedyada Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Si waafaqsan Qodobka 142aad ee Dastuurka Federaalka, Dastuurada Dowlad-Gobolleedyada waa in la waafajiyaa Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka marka dib-u-eegista la dhameystiro lana ansixiyo.

## 7 SIDA LOO HIRGELINAYO QORSHAHAN

### 7.1. In la helo Is-faham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Baarlamaanka FS.

Tallaabada ugu horeysa waa in la helaa isfaham guud iyo aragti mideysan ee hanaanka dib-u-eegista dastuurka, lana dajiyo qaab ay ku midaysan yihiin hogaanka sare ee Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliaya sida Madaxweynaha, Guddoomiyeyaasha labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo Raysul Wasaaraha. Waxaa xusid mudan in dastuurka KMG ah siyaabo kala duwan loo fasiran karo habraaciisa waxkabaddelka dastuurka ee xilliga labaad ee Barlamaanka FS.

Hadaba, hogaanka sare ee siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Baarlamaanka FS, waxaa muhiim ah in ay taageeraan qorshahaan si loo dhammaystiro geedi-socodka dib u eegista Dastuurka.

### 7.2. In la helo Isfaham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka dib-u-eegista Dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada dhexdooda.

Waxaa lagama maarmaan ah in la helo isfaham guud iyo qaab wadajir ah oo ay ku midaysan yihiin hogaanka siyaasadda Dowladaha xubnaha ka ah JFS iyo Dawladda Federaalka. Dowladahaan xubnaha ka ah Federaalka waxaa loo baahan yahay in lagala tashado wax-ka-beddelka dastuurka iyadoo la fulinayo Qodobada dastuurka ku meel-gaarka ah (eeg Qodobka 133) balse loo

baahanyahay in la abuuro ku qanac siyaasadeed lagana taageero kaabayaasha dhaqaale iyo shaqaale loo adeegsanayo hanaanka dib-u-eegista dastuurka. Hadaba, waa in sida ugu dhaqsaha badan loogu daraa qorshaha hanaanka dib-u-eegista dastuurka iyo sameynta qorshe-howleedka loogu talagalay hanaankan.

Si ay u suuratagasho meelmarka qorshahan, waxaa lagama maarmaan ah in loo sameeyo bandhigid qorshahan Madaxweynayaasha, Wasaaradaha ku Shaqada leh, iyo Guddoomiyeyaasha Golayaasha Sharci-dejin ee maamulada kala ah Puntland, Jubaland, Koonfur-Galbeed, Galmudug, Hirshabelle iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

### 7.3. Dhamaystirka qorshe howleedkan

Kadib marka qorshe howleedkan ay isku waafaqaan Wasaarda Arrimaha Dastuurka, Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga Madaxabanaan ee Dibu-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, waxaa si hordhac ah loogala tashanayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Guddoomiyayaasha labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Ra'iisul Warsaaraha, Madaxda Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya. Waxaa qorshe-hawleedka kama dambaysta ah lagu soo bandhigayaa Shirweynaha Qaran ee Dastuurka.

### 7.4. Shirweynaha Qaran ee Daah Furka Dib-u-Eegist Dastuurka

Shirweynahan waxaa kasoo qaybgalaya dhammaan Hay'adaha iyo talo-wadaagayada doorka muhiimka ah ku leh geedi socodka dib-u-eegista dastauurka oo ay ka mid yihiin Dowladda Federaalka, Baarlamaanka, Dowladaha xubnaha ka ah JFS iyo qaybaha kala duwan ee bulshada. Ujeedada Shirweynaha Qaran ee dastuurka waa in si rasmi ah loogu daah furo wajiga 2aad ee Hanaanka dib-u-eegista Dastuurka lana soo jeediyo Qorshaha Istiraatijiyadda Dastuurka ee lagu heshiiyey.

### 7.5. Dhameystirka xubnta ka dhiman Guddiga Madaxbannaan iyo soo magacaabista Ergada

Wasaaradda Arrimaha Dastuurka waxay soo jeedinaysaa magacaabista xubinta ka dhiman Guddiga Madaxabanaan si waafaqsan Dastuurka iyo sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan. Sidoo kale, Dawladaha xubnaha ka ah JFS waxay soo magacabayaan Xubnaha ka dhimman ergada uga mid noqonaya Guddiga Dib-u-eegista iyo La socodka Dastuurka iyo Guddiga Madax banaan ee Dib-u-eegida iyo Hirgelinta Dastuurka si waafaqsan qodobada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah.

Barlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa qaraar qeexaya maqaamka, xuquuqda iyo hanaanka magacaabista ergada ku biiraysa labada Guddi ee dib-u-eegista Dastuurka.

Marka la dhamaystiro ergada, waxaa loo qabanaya tababaro iyo tayo-siin ku aadan taariikhda dastuur samaynta Soomaaliya, xulashooyinkga hanaanka dib-u-eegista dastuurka ee Barlamaankii 9aad, iyo is-barbardhig dastuurada wadama kale si ay xubnaha cusub waajibaadkooda u gutaan.

Howlaha ugu muhiimsan ee la xiriira arrintaan:

- Soo saaridda Qaraar qeexaya maqaanka iyo hanaanka magacaabista Ergada.
- Magaacbidda Ergooyinka ka imaanaya Dowladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ee kusoo biiraya labada Guddi ee Dib-u-eegista Dastuurka.
- Sare u qaadida aqoonta/xirfadda ergada cusub ee kusoo biiraya ee labada Guddi ee Dib-eegista Dastuurka.
- Kor-uqaadida awooda Wasaaraadda Arrimaha Dastuurka, Guddiga La socodka iyo Hirgalinta Dib-u-Eegista Dastuurka iyo Guddiga Madaxabanaan iyagoo shaqaaleysiinaya Lataliyeyaal sharci iyo xirfadlayaal.

### 7.6. Diyaarinta Arimaha Hortabinta u leh Dib-u-eegista Dastuurka

Kadib darsidda Dastuurka KMG ah, Guddiga La socodka iyo Hirgalinta Dastuurku wuxuu diyaarinayaa arrimaha mudnaanta iyo hortabinta u leh hanaanka dib-u-eegista dastuurka, sida ay isugu xigaan iyo shuruucda kale iyagoo la tashanaya Barlamaanka Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 133aad Faqradda 6aad(e) ee Dastuurka KMG ah.

Howlaha ugu muhiimsan ee la xiriira arrintaan:

- Diyaarinta arrimaha mudnaanta iyo hortabinta u leh dib-u-eegista dastuurka.
- Diyaarinta shuruucda hortabinta u leh dib-u-eegista dastuurka.
- La tashi la xiriira arrimaha mudnaan iyo hortabinta u leh dib-u-eegista dastuurka oo lagala tashanayo Barlamaanka Federaalka Soomaaliya.

### 7.7. Ololaha La-tashiga iyo Wacyigelinta Dadweynaha ee la xiriira dib-u-eegista Dastuurka

Marka la diyaariyo arrimaha hortabinta u leh dib-u-eegista dastuurka, Guddiga La socodka iyo Dib-u-Eegista Dastuurka ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya isagoo la kashanaya Warasaarada Arimaha Dastuurka wuxuu qabanaya la-tashi dadweyne iyo olole wacyigalin ee ku aadan arrimaha hortabinta u leh Dib-u-eegista dastuurka si loo ballaariyo latashiga iyo wacyigelinta dadweynaha. Guddiga La socodka isagoo kaashanaya Guddiga Madaxabanaan ee Dastuurka wuxuu diyaarinaya qoraalada hortabinta latashiga iyo wacyigelinta bulshada Soomaaliyeed, si uu ugu bandhigo dadweynaha iyo ururada Bulshada Rayidka ah. Wasaaradda Arrimaha Dastuurka waxay isku-

dubaridaysaa isla markaana fududeynaysaa arrimaha wacyigelinta iyo latashiga dadweynaha iyadoo la kaashanaysa Wasaaradaha masuulka ka ah dastuurka ee dawladaha xubnaha ka ah JFS

Sidoo kale Wasaaradda Arrimaha Dastuurku waxay diyaarinaysaa istraatijiyada wacyigelinta bulshada si loo fududeeyo Ololaha ka qayb galka dadweynaha iyadoo lala kaashanaya labada Guddi ee Dib-u- eegista Dastuurka, Dawlad Goboleedyada iyo bulshada rayidka.

Ujeedada latashigani waa in lasiiyo bulshada Soomaaliyeed fursado ay kaga qayb-galaan howlaha dib-u-eegista dastuurka soomaaliya iyadoo laqabanayo Dood-madaleed, kulamada gobolada & degmooyinka iyo Aqoon iswaydaarsi.

Waxaa la qorsheenayaa in la agaasimo wadatashi dadweyne iyo olole wacyigelin ee heer Dowlad-Goboleed, ujeedaduna waa in Wasaaradaha masuulka ka ah Arrimaha Dastuurka ee dawladaha xubnaha ka ah JFS ay ka qayb-qaataan wacyigelinta, qeybinta nuxurka wacyi-gelinta, uruurinta iyo daraaseynta talooyinka lasoo gudbiyey iyo gaarsiinta tallooyinkaas Guddiga La socodka ee Baarlamaanka, Wasaarada Arrimaha Dastuurka iyo Guddiga Madaxabanaan.

Guddiga Baarlamaanka waxay u gudbinayaan tallooyinkii lagasoo uruuriyey dadweynaha Soomaaliyeed Guddiga Madaxabanaan si ay u diyaariyaan qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka iyadoo lagu saleynayo tallooyinka lasoo gudbiyey iyo jawaab celinta laga helaayo Wasaaradaha masuulka ka ah Arrimaha Dastuurka ee Dowladaha Xubnaha ka ah JFS kadib latashiga dadweynaha Soomaaliyeed.

Howlaha ugu muhiimsan arrintaan:

- Diyaarinta qoraalada latashiga dadweynaha.
- Waafajinta qoraalada la-tashiga dadweynaha baahida gaarka u ah dowladaha xubnaha ka Federaalka
- Qabashada La-tashiyada dadweyne ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS.
- Soo uruurinta warbixinada iyo natiijooyinka kasoo baxay la tashiyada dadweynaha ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS
- Soojeedinta natiijada la-tashiga dadweynaha ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS.

### 7.8. Diyaarinta Qabyo-qoraalka Wax-ka-beddelka Dastuurka

Kadib qabashada la-tashi dadweyne oo ballaaran iyo ololaha wacyiglinta laguna soo uruuriyey natiijooyinka iyo tallooyinka dhammaan Dowlad-Goboleedyada, Maamulka Gobolka Banaadir, maamulada kale ee dalka, iyo qaybaha bulshada, Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxabanaan waxay bilaabayaa qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka Dastuurka. Sidaas darteed, Guddiga La socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga

Madaxabanaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waa in ay wax ka-badalkooda ku saleeyaan talooyinkii ay soo jeediyeen dadka Soomaaliyeed iyo daneeyeyaasha kale ee hanaanka dib-u-eegista dastuurka Soomaaliya.

Howlaha ugu muhiimsan ee arrintaan:

- Is-barbardhiga Falanqaynta natiijooyinkii kasoo baxay la-tashigii  laga sameeyey Dowladaha Xubnaha ka ah JFS , Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka.
- Diyaarinta qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka oo ku saleysan natiijadii la-tashiga Dowladaha Xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka.

### 7.9. La-tashi siyaasadeed ee Hay'adaha ku shaqada leh Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka ee la xiriira Qabyo-qoraalka wax ka badalka dastuurka

Qabyo-qoraalada wax-ka-beddelka dastuurka la diyaariyey waxaa lagala tashanayaa dawladda Federaalka sida Madaxweynaha JFS, labada Guddoomiye ee Barlaamaanka FS, Raysul Wasaaraha, Golaha wasiirada, Dawladaha xubanaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka gaar ahaan arrimaha u baahan wadaxaajood siyaasadeeed, waxaana fududeenaya Wasaaradda Arimaha Dastuurka iyadoo la kaashanaysa labada Guddi ee loo igmadey dib-u-eegista Dastuurka.

Guddiga La socodka iyo Dib-u-Eegista Dastuurka isagoo la kaashanaya wasaaradda Arimaha Dastuurka wuxuu la tashanayaaa golaysheesha sharci-dejinta ee Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda JFS si waafaqsan qodobka 133aad faqraddiisa 6aad(f).

Ujeedada latashigu waa in la helaa wadaxaajood-siyaasadeed qaran oo ku saabsan hanaanka geedi socodka dib u eegista Dastuurka si loo helo talooyinka madaxda qaran ee DFS, madaxda dawladaha xubnaha ka ah JFS, maamulada kamid ka ah JFS iyo daneeyeyaasha kale si loo xaqiijiyo daahfurnaanta lagama maarmaanka ah iyo hannaan loo dhanyahay. Warbixinada iyo natiijooyinka ka soo baxa wadatashiyada waa in loo uruuriyaa loona soo bandhigaa qaab daahfurnaan ah.

Howlaha ugu waaweyn ee la qabanayo:

- Soo jeedinta qabyo-qoraalka wax-ka-badalka dastuurka oo loo sameynayo Hay'adaha ku shaqada leh ee heer federal
- Soo jeedinta qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka oo loo sameynayo Hay'adaha ku shaqada leh ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka.

- Aqoon iswaydaarsi wada-tashi oo lala yeesho Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka
- Aqoon iswaydaarsi wada-tashi oo lala yeesho Hay'adaha ku shaqada leh ee heer federaal
- Shirweyne Gunaanad ah ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah JFS
- Uruurinta natiijooyinkii iyo warbixinadii ku saabsanaa la tashiyada siyaasadeed ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah JFS

## 7.10. Shirweynaha Qaran ee Dhameystirka Dastuurka

Wasaaradda Arrimaha Dastuurka ee Federaalka iyadoo la kaashanaysa Guddiga La-socodka Dastuurka ee Baarlamaanka waxay soo agaasimeysaa Shirweynaha Qaran ee Dhameystiraka wajiga ugu dambeeya ee latashiyada siyaasadeed iyo midda dadweyne kuna aadan hannaanka dib u eegista Dastuurka ujeedadiisuna tahay in la siiyo daneeyeyaasha kala duwan fursad ay ku gudbiyaan aragtidooda ka hor inta aan loo gudbin Baarlmaanka Federaalka. Guddiga Madaxabanaan iyo Guddiga La Socodka waxay talooyinka ka soo baxa shirweynaha qaran si waafaqsan natiijada kasoo baxday wada-tashiga siyaasada iyo dadweynaha ku darayaan Qabyo-qoraalka kama danbeyska ah ee wax ka bedelaka Dastuurka la horgaynayo Baarlamaanka Federaalka.

Warbixinta dib-u-eegista kama dambeysta ah waa inay sharaxaad ka bixisaa diyaarinta qabyo-qoraalka wax-ka-badalka dastuurka, maangalnimada, sababaha iyo cudur daarada, si ay u fududaato meel marintiisa. Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ayaa u gudbinaya qabyo-qoraalka iyo warbxinta la socota iyo go'aanka kama dambeysta ah Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sida ku xusan Qodobka 133 (10) ee dastuurka ku meel-gaarka ah ee Soomaaliya.

## 7.11. Soo saarista nuqulka kama dambeysta ah ee wax-ka-beddelka Dastuurka

Iyada oo lagu saleynayo natiijada ka soo baxday wadatashiyada siyaasadeed iyo kuwa dadweynaha ka hor inta aan loo gudbin qabyo-qoraalka wax ka badalka dastuurka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa loo baahan yahay in la-tashi lala sameeyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah si waafaqsan Qodobka 134 (7) (f) si loo hubiyo in soo jeedimaha ay waafaqsan yihiin Dastuurka ku meel-gaarka ah ee Soomaaliya nuxur iyo macno.

Haddii Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ku qanco wax-ka-beddelka dastuurka ee uu soo gudbiyey Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka, kadbib guddigu waxaa uu u gudbin karaa qabyo-qoraalada wax-ka-badalka dastuurka iyo warxbixnta la socta labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Haddii lagu qanco qabyo-qoraalka kama dambeysta ah ee wax ka badalka dastuurka sida ay u soo gudbiyeen Guddiga Baarlmaanka ee La-socodka iyo

Dib-u-eegista dastuurka, fadhiga gole walabaa waxaa uu u baahan yahay inuu ku meel-mariyo qabyo-qoraalkan wax-ka-badalka dastuurka cod ah 2/3 ee codadka xubnaha guud sida ku xusan 136 (1) ee Dastuurka KMG.

Howlaha ugu muhiimsan u baahan in la qabto

- Falanqeyn isbarbardhig ee natiijooyinka kasoo baxay watashiga siyaasadeed ee ka dhexeeyey Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka.
- Diyaarinta qabyo-qoraalka kama dambeysta ah ee wax-ka-badalka dastuurka oo ku saleysan natiijooyinkii wadahadalka siyaasadeed ee u dhaxeeyey Dowladda Federaalka ah iyo Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka
- In loo gudbiyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah si uu hubiyo waafaqsanaanta qabyo-qoraalka kama dambeysta ah ee wax-ka-beddelka Dastuurka.
- Meel marinta wax-kabadalka dastuurka ee kama dambeysta ah ay sameynayaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

### 7.12. Ololaha Wacyigelinta ee la xiriirta Wax-ka-beddelka Dastuurka la meel mariyey iyo qaabka Aftida

Marka wax-ka-bedalka Dastuurka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka ah ee Soomaaliya, Guddiga Baarlmaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxay xaqiijinayaan bilaabashada olole balaaran oo wacyigelin ah oo la xiriira wax-ka-beddelka Dastuurka la meel mariyey oo ay bilaabeyso Wasaarada Arrimaha Dastuurka. Ugu dambeyn, shacabka Soomaaliyeed waxaa uu u baahan yahay in uu ansaxiyo dib-u-eegida iyo wax-ka-bedalka dastuurka si uu u noqdo Dastuur kama danbeys ah ee Soomaaliya yeelato. Si loola socodsiiyo loogana dhaadhiciyo dadka Soomaaliyeed waxa ku qoran Dastuurkan wax laga bedalay dib-u-eegistana lagu sameeyey, waxaa loo baahan yahay gaaritaan dadweyne oo balaaran iyo olole wacyigelin. Baranaamijkan waxaa fulinaya Wasaarada Arrimaha Dastuurka ee heer Federaal iyo heer Dowlad Goboleed.

Waxaa la diyaarinayaa sharciga aftida dadweynaha oo u noqonaya saldhig xeerarka ay ku ansixinayaan dadweynaha Dastuurka KMG si uu u noqdo Dastuur kama dambeys ah si waafaqsan qodobka 141 ee Dastuurka KMG. Xukuumadda Federaalka ayaa diyaarinaysa Sharciga aftida.

Dhamaadka hannaanka dib-u-eegista dastuurka oo ku saleysan xeerka aftida ee la ansixiyey iyo xeerarka kale muhiimka ah, waxay noqon doontaa in Guddiga Madax banaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo hay'adaha kale ee awooda u leh arinkan, in ay diyaariyaan ayna qabtaan afti u

ogolaaneysa shacabka Soomaaliyeed in ay si kama dambeys ah u ansixiyaan dastuurka ku meel-gaarka ah ee Soomaaliya sida dib-u-eegista loogu sameeyey waxna looga badalay.

## 8. JADWALKA QORSHE-HAWLEEDKA

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| 1. In la helo Isfaham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka dib-u-eegista dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliyeed iyo Baarlamaanka FS. | In lagu midoobo geedi-socodka hannaan dib-u-eegista dastuurka. | Diyaarinta Qorshe hawleedka hannaanka dib-u-eegista dastuurka. | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 9/17-11/17 | Qabsoomay |
| | | La tashiyo Guddoonka labada Gole iyo Baarlamaanka ee Qorshaha Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka | • Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS | 10/17 | Qabsoomay |
| | | La tashiyo R/Wasaaraha ee Qorshaha Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka | 10/17 – 11/17 | Qabsoomay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | |
| | | La tashiyo Madaxweynaha Qorshaha Hanaanka Dib-u-eegista Dastuurka | • Guddoonka Barlaamaanka JFS<br>• Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay |
| | | Soo bandhigida Qorshaha Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka Madaxweynaha, Raiisul Wasaaraha iyo Guddoomiyayaasha Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| 2. In la helo Isfaham guud iyo aragti mideysan ee geedi-socodka Dib-u-eegista dastuurka ee u dhaxeeya Hogaanka Siyaasadda Dowladda Federaalka Soomaaliyeed, Baarlamaanka Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah JFS iyo Dowlad Goboleedyada dhexdooda. | In la helo hannaan loowada dhanyahay ee Geedi-socod dib-u-eegista dastuurka lagu gaarsiiyo dawladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | U soo bandhigida Qorshe hawleedka hannaanka Dib-u-eegista dastuurka dawladaha xubnaha ka ah JFS (laamaha fulinta iyo sharci-dejinta), Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka. | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay |
| | | Kulan hawleed La-tashi lala yeesho Hay'adaha ku shaqada leh ee heer Federaal, dawladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka<br>• Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | | | |
| | | Ku darista qorshe-hawleedka Talooyinka Hay'adaha dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubinta ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay |
| 3. Shirweynaha Qaran ee daahfurka dib u eegista Dastuurka | In si rasmi ah loo daah furo wajiga labaad ee | Daah furka Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS | 12/17 | Qabsoomay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka iyo in lasoo bandhigo Qorshe loo Dhanyahay | iyo Soo Bandhigidda Qorshahiisa | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | | |
| 4. Dhameystirka xubinta ka dhiman guddiga madaxabanaan iyo magacaabista ergada | In la dhamaystiro xubinta ka dhimman Guddiga Madaxabanaan iyo ergoyinka labada Guddi ee dib-u-eegista dastuurka. | - Soo jeedinta magacaabidda xubinta ka dhiman Guddiga Madaxabanaan | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS | 11/17 | Qabsoomay |
| | | - Soo jeedinta iyo ansixinta Qaraar baarlamaani ah oo qeexaya maqaanka iyo hanaanka magacaabidda Ergada | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka | 11/17 | Waa laga kaaftoomay |
| | | - In Dawlad Goboleedyada loo | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka | 11/17 | Qabsoomay<br>*F.G:* |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | gudbiyo qoraal looga codsanayo soo magacaabidda ergada ugu mid noqonaya labada guddi | | | *Dowladgoboledyada ergooyinkii ku soo biiri lahaay labada guddi way soo gudbisteen, balse ergadii lagu biirinlahay Guddiga Madaxa Banaayaa wali maqan* |
| | | Kor-uqaadida awooda saddexda Hay'adood ee ku shaqada leh Dib-u-eegista Dastuurka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 12/17 | Qabsoomay |
| | | Diyaarinta Arrimaha hortabinta u leh Dib-u-eegista iyo | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u- | 12/17 | Qabsoomay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Arrimaha kale ee Mudnaanta leh | eegista iyo Hirgelinta Dastuurka<br>• Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS | | |
| 5. Ololaha La-tashiga iyo Wacyigelinta Dadweynaha ee la xiriira arrimaha hortabinta u leh dib-u-eegista Dastuurka. | In sare loo qaado sharciyadda iyo daah- furnaanta geedi-socodka Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka si dadweynuhu ugu qancaan | Diyaarinta qoraalada loogu talagaly la-tashiga dadweynaha iyo wacyigalinta. | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 11/17-12/17 | Waa socotaa |
| | | Waafajinta qoraalada la-tashiga dadweynaha baahida gaarka u ah dowladaha xubnaha ka ah JFS | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Wasaradaha Dastuurka ee Dawlad Goboleedyada | 11/17-12/17 | Eeg Lifaaqa Istiraatiijiyadda Wacyigalinta iyo Latashiga Dadwaynaha. |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
| --- | --- | --- | --- | --- | --- |
| | | Qabashada wacyi gelinta bulshada iyo la-tashiyada dadweynaha ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka<br>• Wasaradaha Dastuurka ee Dawlad Goboleedyada<br>• Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka<br>• Guddiyada Dastuurka ee Dawlad Goboleedyada | 12/17- | Waa socotaa |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Soo uruurinta warbixinada iyo natiijooyinka kasoo baxay la tashiyada dadweynaha ee Dowladaha xubnaha ka ah JFS | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 02/19-07/2019 | |
| 6. Diyaarinta Qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka | In la dhamaystiro qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka si tashi dheeraad ah loo geliyo | Falanqeyn isbarbardhig ee natiijooyinka kasoo baxay watashiga siyaasadeed ee ka dhexeeyey Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka. | • Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 02/18 – 06/19 | Waa socotaa |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Diyaarinta qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka oo ku saleysan natiijadii la-tashiga Dowladaha Xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 03/18 – 08/18 | |
| 7. La-tashi siyaasadeed ee Hay'adaha ku shaqada leh ee Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka ee la xiriira qabyo qoraalka wax ka | In sare loo qaado sharciyada iyo daah furnaanta Lana keeno xal siyaasadeed ee u dhexeeya qeybaha kala duwan ee dowladda | Soo jeedinta qabyo-qoraalka wax-ka-bedalka dastuurka oo loo sameynayo Hay'adaha ku shaqada leh ee heer federaal | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka | 04/18-07/19 | Waa socotaa |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| bedalka dastuurka | Soomaaliya | Soo jeedinta qabyo-qoraalka wax-ka-beddelka dastuurka oo loo sameynayo Hay'adaha ku shaqada leh ee dawladaha xubnaha ka ah JFS ,Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Wasaaradda Arrimaha Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 04/18 | Waa Socotaa |
| | | Aqoon iswaydaarsi wada-tashi oo lala yeesho dawladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u- | 05/18<br>02/19 | Waa Socotaa |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | kale ee dalka | eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | | |
| | | Shirweyne Gunaanud ah ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 03/19 | Waxaa loola Jeedaa Shirarka wada-xaajoodka siyaasadeed ee madaxda fulinta Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka. |
| | | Uruurinta natiijooyinkii iyo warbixinadii ku saabsanaa la tashiyada siyaasadeed ee Dowladda Federaalka iyo | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 04/19 | Waxaa la soo uruuriyay warmurtiyeedyadii iyo heshiisyadii ku saabsanaa latashiyada wada xaajoodka siyaasadeed(Qodobada 44,47) ee la qabtay |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Dowladaha Xubnaha ka ah JFS, Maamulka Gobolka Banaadir iyo maamulada kale ee dalka | | | Juun 2018, kuwakana waa la sugayaa |
| 8. Shirweynaha Qaran ee Dhameystirka Dastuurka | In la siiyo dhammaan daneeyayaasha fursada ay si daah furan usoo bandhigaan aragtidooda ka hor inta aan loo gudbin Baarlamaanka Federaalka. | Soo bandhigidda natiijada kama dambeysta ah ee la-tashiyada iyo dhex-galka dadweynaha | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka iyo<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 05/19 | Waqtiga oo yar owgiis waxaa la soo jeediyay in la iska dhaafo shirwaynaha |
| *9.* Soo saarista nuqulka kama dambeysta ah ee wax-ka-beddelka | In la diyaariyo lana ansixiyo nuqulka kama | Falaanqeyn isbarbardhig natiijooyinka kasoo | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista | 06/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| dastuurka iyada oo lagu saleynayo natiijada ka soo baxday wadatashiyada siyaasadeed iyo kuwa dadweynaha iyo Ansixinta nuqulka ugu dambeeya ee dastuurka qabyada ah ee labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | danbeysta ah ee Dastuurka. | baxay watashiga siyaasadeed ee ka dhexeeyey Dowladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah Federaalka | Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | | |
| | | Diyaarinta qabyo-qoraalka kama dambeysta ah ee wax-ka-badelka dastuurka oo ku saleysan natiijooyinkii wadahadalka siyaasadeed ee u dhaxeeyey Dowladda Federaalka iyo | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka | 07/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Dowladaha xubnaha ka ah JFS | | | |
| | | In loo gudbiyo Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuuriga ah si uu hubiyo waafaqsanaanta qabyo-qoraalka kama dambeyssta ah ee wax-ka-beddelka Dastuurka. | • Guddiga Baarlamaanka ee La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Dib-u-eegista iyo<br>• Hirgelinta Dastuurka Maxkamadda Dastuuriga ah | 09/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda *F.G: Waxaa la soo jeediyay in loo gudbiyo Maxakamadda Dastuurka* |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay’adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Ansixinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Wax-ka-badelka ugu dambeeya ee Dastuurka | • Gudoonka Golaha Shacabka iyo<br>• Golaha Aqalka Sare | 10/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |
| 10.Ololaha Wacyigelinta ee la xiriirta Wax-ka-bedelka Dastuurka la meel mariyey iyo qaabka Aftida | Dadweynaha Soomaaliyeed oo meel mariya dastuurka qaabka Aftida | Diyaarinta Sharciga Aftida loogu qaadayo Dastuurka | • Wasaardda Arrimaha Dastuurka DFS | 7/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |
| | | Ansixinta Sharciga Aftida loogu qaadayo Dastuurka | • Golaha Shacabka iyo<br>• Golaha Aqalka Sare | 9/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |
| | | Agaasimida iyo Qabashada Barnaamij Wacyigelinta Dadweynaha iyo | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Wasaradaha Dastuurka ee Dawlad Goboleedyada | 10-12/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |

| Hawsha | Ujeedada | Waxqabadka | Hay'adda u xilsaaran | Waqtiga | Faallo |
|---|---|---|---|---|---|
| | | Waxbarashada Madaniga ah ee ku saabsan Dastuurka la qabyo tiray | | | |
| | | Agaasimidda iyo Qabashada Aftida Dastuurka | • Wasaaradda Arrimaha Dastuurka DFS<br>• Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka<br>• Guddiga Madaxa banaan ee Doorashooyinka Qaranka | 12/19 | Waxaa la qabanayaa marka la gaaro waqtigeeda |